# Difaacyada Shaqaalaha ee Shaqaalaha Ababka ka Shaqeeya

Seattle Office of Labor Standards

## Shaqaalahee helaaya difaac?

Sharciyadaan ayaa quseeya shaqaale kasta oo adeegsada ababka si ay u helaan shaqooyinka una aqbalaan yabooha shaqada lacagta lagu bixinaayo si uu adeeg u sameeyo gudaha Seattle.

## Waa ababkee?

Ababka ay leeyihiin "Shirkadaha Shabakadda" ayaa ku jira laakiin waa maxay shirkada shabakad?

Waxay leedahay **250+** shaqaalaha abka ah caalamka oo dhan

Waxay macaamiisha ku xidhaa shaqaalaha

Waxay u soo bandhigtaa yabooha shaqada shaqaalaha ku jira abka

Waxay qiimeyaal u dejisaa lacagta

Waxay la socotaa badka iyo wakhtiga shaqaaluhu ku baxshay shaqada

## Lacagta Ugu Yar ee Shaqaalaha Aabka

Shaqaalaha la difaacaayo ayaa ku helaya lacagta ugu yar wakhtiga iyo badka ay gaariga wadeen.

**$0.45/ daqiiqadii** + **$0.77/ maylkii** **Ama** **$5.20** **Hadba kii badan**

Haddii aad bilaabayso shaqada yabooha 2 saac gudahood, waxaad xisaabin kartaa wakhtiga/maylasha laga bilaabo marka aad yabooha aqbashay. Haddii kale, waxaad keliya xisaabin kartaa wakhtiga/maylasha laga bilaabo marka koobaad ee aad shaqada biloowdo.

Haddii aad shaqada ka biloowdo meel ka baxsan Seattle, waxaad keliya xisaabin kartaa wakhtiga/maylasha marka aad soo gasho Magaallada. Haddii aad shaqada ka biloowdo Seattle dhexdeeda, dhammaan wakhtiga/maylasha waa la xisaabinayaa.

## Baro Xuquuqdaada

- ✓ Waad dooranaysaa marka iyo cadadka aad shaqeynayso iyo dalabaadka aad aqbalayso.
- ✓ Shirkada waxaa qasab ku ah inay ku siiso qiyaasta maylasha iyo wakhtiga dalabku qaadanaayo.
- ✓ Waa inaad heshaa dhammaan deeqaha macaamiishu kuu gartaan. Deeqaha macaamiishu kuu gartaan ayaan lagu darayn mushaarkaaga ugu yar.

# Difaacyada Shaqaalaha ee Shaqaalaha Ababka ka Shaqeeya

Seattle Office of Labor Standards

## Fasaxa Mushaarka leh ee Qofka jiran iyo Fasaxa Badbaadada ee Shaqalaha Abka (PSST)

Shaqaalaha la difaacaayo ayaa qaadan kara fasaxa maalmaha ay mushaarka ku helayaan sababahaan soo socda awgood:

- Si ay u daryeelaan caafimaadkooda jidhka ama maskaxda ama kan xubinta qoyskooda
  - Waxaa ku jira balamaha dhakhtarka
- Si aad u daryeesho naftaada ama xubinta qoyska ee waajahaaya rabshada qoyska, kufsi galmo, ama ugaarsi
- Marka dugsiga xubin kamid ah qoyska ama goobta daryeelka la xiro
- Haddii shaqadu u joogsato ama gaabis u noqoto sababo caafimaad ama badqabka la xiriira

## PSST meeqa dhan ayaan helayaa?

Waxaad helaysaa ugu yaraan hal maalin oo PSST 30-kii maalmood kasta oo aad ka shaqeyso Seattle.

Maalin kasta oo cid ka qaado ama gayso Seattle ayaa tirada lagu darayaa.

## Lacag intee dhan ayaan helayaa?

Mushaarkaaga celcelis ahaan maalintii ee aad ku helayso maalmaha aad ka dhex shaqeysay Seattle 12 bilood ee lasoo dhaafay (kuma jiraan deeqaha macmiilku kuu garto).

## Sidee ayaan u adeegsanayaa PSST?


PSST-gaaga waa inaad heshaa si aad u isticmaasho hal asbuuc kadib marka aad xaq u yeelato.

Waad bilaabi kartaa isticmaalka PSST-kaaga marka ay diyaar noqotaba marba haddii aad abka u shaqeynaysay 90 maalmood kahor inta aadan codsan wakhtiga fasaxa.

Marka aad codsato PSST, waa inaad heshaa wakhti fasaxa markaasba. Wakhtigaaga fasaxa ayaa soconaaya 24 saacadood ilaa inaad codsato maahee kabadan.

## Baro Xuquuqdaada

- Shirkada ayaan kaa codsan karin inaad keento cadeynta sababta aad u qaadanayso PSST ilaa inaad qaadanayso maahee wax ka badan 3 maalmood oo xiriir ah.
- Shirkada ayaa diidi karta inay lacag kugu siiso PSST gaaga haddii aad shaqeyso wakhtiga fasaxaaga.
- Shirkada ayaan talaabo xun kaa qaadi karin sabab la xiriirta inaad codsanayso ama adeegsanayso PSST.



## Soo gudbi Cabasho

Shirkada aad u shaqeyso miyaysan ku dhaqmin sharcigaan? Waxaad soo gudbin kartaa cabasho adoo adeegsanaaya xogta hoose:

- 206-256-5297
- laborinquiry.seattle.gov/employee-inquiry/
- ama halkaan mari iskaanka!

Adegeyada turjumaada ayaa lagu heli karaa taleefanka.